



Xubnaha oo la kulmay Hoggaanka Guddiga STEAM

Xubnaha ka tirsan bulshada Dugsiyada Dadweynaha Portland oo daneynaya in ay gacan ka geystaan dejinta qaab waxbarasho oo loogu talagalay manhajka STEAM ee degmada (sayniska, teknoolajiyada, injineernimada, farshaxanka iyo xisaabta) waxaa lagu martiqaaday in ay codsadaan Hoggaanka Guddiga STEAM.

Iyada oo la isticmaalayo aragti sinnaani ku jirto, guddig – oo ay sidoo kale ka mid noqon doonaan macallimiin iyo shaqaalaha taageerada ee xafiiska dhexe – waxay raadin doonaan in ay:

- Abuuraan aragti la wadaago oo loogu talagalay waxbarashada STEAM
- Dejiyaan erayo caadi ah
- Abuuraan mabaad'ii wax hoggaamisa

Qof kasta oo daneynaya waa in uu codsado isaga oo isticmaalaya [foomka internet-ka](#) muddo aan ka dambeyn Jimcaha, Maarso 8. Kooxda STEAM ayaa email u diri doonta kuwa la soo xusho muddo aan ka dambeyn Maarso 20. Guddigu waxay qabataa sideed kulan oo taxane ah kaasi oo bilaabmaya Abriil 4 laga bilaabo 4:15 ilaa 6:45 galabnimo, isaga oo ka dhacaya Holladay Annex, 2600 SE 71st Ave.

Wicitaanka kooxda STEAM ee loogu talagalay xubnaha ayaa lagu sheegay:

Wadajir ahaan waxaan uga shaqeynaysaa in aanu ardaydeena ka taageerno horumarinta xirfadaha farsamo, iyo isticraatijiyadaha fikirka hal-abuurka leh ee muhiimka ah, iyo xirfadaha xallinta dhibaatooyinka si loo awoodo, muwaadiniinta caalamka oo faraxsan, caafimaad leh, miro-dhal ah. Xirfadaha mustaqbalka ee ardaydeenu la kulmayaan si degdeg ah ay isku bedelayaan. Waa maxay xirfadaha iyo isticraatijiyada ay ardaydu u baahan doonaan si yeeshaan fikir hal-abuurka leh iyo xallinta dhibaatooyinka ee mustaqbalkeena sida joogtada isku beddelaya? Sidee bay qalin-jabiyeyaasheenu uga wada shaqeyn doonaan dhammaan xeerarka anshaxa? Sidee bay isku darka STEAM qayb uga ciyaartaa caawinta ardaydeenu in ay noqdaan kuwo hal abuur leh, fikrado cusub keena, iyo muwaadiniinta caalamka oo muhiim ah?

Waan ognahay in fursadaha waxbarashada isku dhafan ay qayb ka noqon doonto mustaqbalkan. Fahamka isku xirnaanta u dhaxeeya xeerarka anshaxa ayaa muhiim u ah dhisida aasaas loogu talagalay ka qayb qaataha ee dhanka bulshadeena mustaqbalka. Macallimiinta, xubnaha bulshada ka tirsan iyo maamulayaasha ayaa door ka ciyaari doona fududeynta si ardayda si wanaagsan loogu diyaariyo wixii isku day adag ah.

Qof kasta oo su'aalo qabaa waa in uu la xiriiraa [Kristin Moon](#) ama [Susan Holveck](#).